

NSW Health Factsheet - Somali

Xiriirka ka dhaxeeya TB iyo warqada xaqiiqda ee -HIV

The connection between TB and HIV

Tani waa warqada xaqiiqda ee ku saabsan Cudurka Qaaxada/feeraha (TB) iyo Feyraska Hoos udhaca difaaca jirka Bani'aadamka (HIV), feyraska dhaliya Astaanta Hoos udhaca Difaaca ee La qaado (AIDS). Dadka qaba HIV waxay aad ugu dhow yihiin inay u jiradaan cudurada kale iyo infekshinada. TB waa mid ka mid ah cudurada. Haddii lagugu wiisateeyo TB ama haddii aad qabto HIV, warqadan xaqiiqda adiga ayaa laguugu talagalay.

Qiyaasta 40 milyan qof ee qaba HIV ama AIDS, 13 milyan oo ka mid ahi waxay qabaan TB. Ogaanshaha wakhtiga hore waa muhiim haddii aad qabto HIV iyo sidoo kale TB. Haddii labadan infekshin aan la daaweyn, way wadashaqeyn karaan si ay u dhaliyaan jirooyin aad u daran.

QAYBTA 1: QAAXADA/FEERAHA (TB)

Waa maxay TB?

TB waxaa dhaliya bakteeriyo (Jeermis). Waa cudur badanaa saameeya sanbabada laakiinse waxay sidoo kale saameyn kartaa qabaha kale ee jirka, sida maskaxda, kelyaha ama lafdhabarta. TB waxay noqon kartaa mid ku firfircoon jirka ama aan ku firfircooneyn (huruda). Haddii aan la daaweyn, TB firfircooni waxay sababi kartaa dhibaatooyin caafimaad oo khatar ah, ama xitaa dhimasho.

Sidee bay TB -du ku faaftaa?

Bakteeriya (jeermiska) TB waxay ku faaftaa qof ilaa ka qof iyadoo hawada iyadoo raaceysa waxaana badanaa ay faaftaa marka qof qaba TB firfircoon uu qufaco, qoslo, hindhiso ama heeso. Cid kasta oo u dhow wuu neefsan karaa bakteeriyada TB oo uu qaadi karaa TB. TB lagu MA faafiyo isticmaalka maacuunka guriga, koobabka ama saxamada ama candhuuf markaad qof dhunkaneysid.

Waa maxay astaamaha TB firfircoon?

Dadka qaba TB firfircoon badanaa:

- | | |
|---|---|
| <ul style="list-style-type: none"> waxay dareemaan jiro iyo daciifnimo si dhakhsa ah ayey u lumiyaan miisaanka way qufacaan (marmarka qaarkood dhiig) iyo xannuuka xabadka | <ul style="list-style-type: none"> waxay yeeshaan xumad, iyo habeenkii way dhididaan ama marmarka qaarkood maba laha wax astaamo ah. |
|---|---|

Waa maxay kala duwanaanta u dhaxeysa TB firfircoon iyo TB huruda?

Dadka qaba TB firfircoon waxay u jiran yihiin tiro aad u ballaadhan oo ah jeermiska TB oo jirkooda ku firfircoon. Dadka qaba TB huruda waxay sidoo kale leeyihiin bakteeriyada dhalisa TB firfircoon, laakiinse ma jirana sababtoo ah bakteeriyada ayaan ku firfircooneyn (huruda) jirkooda. Badanaa waxay qaadeen bakteeriyada TB hadda ka hor si kastaba ha ahaatee, dadka qaba TB aan firfircooneyn waxay yeelan karaan TB firfircoon mustaqbalka, khaas ahaan haddii ay sidoo kale qabaan HIV.

<p>Haddii aad qabto TB firfircoon taas micnaheedu waxaa weeye in:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Aad leedahay bakteeriyada TB firfircoon jirkaaga • Aad jiran tahay oo laga yaabo inaad leedahay astaamo, sida qufac, xuimad, xuleyka oo kaa dhaca, daal iyo dhidhka habeenkii • Aad awoodo inaad ku faafiso bakteeriyada TB dadka kale • Aad qaadan karto daawo si aad u daaweyso cudurka 	<p>Haddii aad qabto TB aan firfircooneyn micnaheedu waxaa weeye in:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Aad qabto bakteeriyada TB laakiinse aysan firfircooneyn • Aadan jiraneyn • Aadan ku faafin karin bakteeriyada TB dadka kale • Aad qaadan kartid daawo si aad ugaga hortagto qaadida TB firfircoon mustaqbalka
---	---

QAYBTA 2: FEYRASKA HOOS U DHACA DIFAACA JIRKA (HIV)

Waa maxay HIV?

HIV waa feyraska dhalin kara AIDS. HIV waxay weerartaa habka difaaca jirka. Haddii uu kugu dhacay HIV waxaa lagu oranayaa in lagaa helay HIV. Taas micnaheedu waxaa weeye HIV ayaa galay dhiig mareenkaaga.

Sidee baa loo gudbiyaa HIV?

HIV waxaa laga helaa dareeraha jirka sida dhiiga, shahwada iyo dareeraha ferjiga, iyo caanaha naaska. Infekshinka HIV wuxuu dhici karaa oo kaliya marka mid ama wax ka badan oo ah dareeraha jirka ee qof qaba uu galo dhiig mareenka qof kale.

HIV waxaa loo gudbiyaa oo kaliya siyaalahan soo socda:

- Galmo aan kondhom la heyn (galmo aan wax laga gashan)
- Wadaagida irbado, silingayaal iyo qalabka daawada laysku duro ee kale
- Hooyada iyo ilmaha intay uurka leedahay, dhalmada ilmaha ama naas nuujinta
- Dhiig ku shubida iyo/ama waxyaalaha dhiiga (Australiya gudaheeda waxyaalaha dhiiga ah waa laga iskiriingareenayey oo baadhayey HIV ilaa 1985)

HIV LAYSKUMA gudbin kar: qufac, dhunkasho, hindhisid, candhuufid, oohin, wadaagida fargeetooyinka iyo malgacadaha, go'yaasha sariirta lagu goglo, musqulaha, qubeyska ama nooc kasta oo ah jirka oo aan si aan badneyn isu gaara.

Waa maxay astaamaha HIV?

Kuma sheegi kartid adoo eegaya haddii uu qofi qabo HIV. Dadka badidiisa ee qaba HIV waxay u muuqdaan kuwo caafimaad qaba mana laha wax astaamo ah. Waxaa laga yaabaa inay qaadato dhawr sannadood ka hor intaan wax astaamo ahi bilaabin inay muuqdaan dad badan oo qaba HIV ma oga iyaga laftigoodu.

Waa maxay kala duwanaanta u dhaxeysa HIV iyo AIDS?

HIV wuxuu weeraraa habka difaaca jirka. Haddii aan la daaweyn HIV wuxuu waxyeelleeyaa habka difaaca halkaas oo uusan awoodin la dagaalanka infekshinka caamka ah qofkuna wuxuu khatar ugu jiraa jiro iyo xitaa dhimasho. Tani waa xaallada loo yaqaan AIDS- Astaanta Hoos u dhaca Difaaca ee la Qaaday.

<p>Haddii aad qabto HIV micnaheedu waxaa weeye adigu :</p> <ul style="list-style-type: none"> • Waxaad qabtaa feyraska dhaliya AIDS • Waxaa laga yaabaa inaad yeelan wax astaamo ah • In lagu daaweyn karo

QAYBTA 3: TB IYO HIV – BAARITAANKIISA IYO ISKIRIINGAREYNTIISA

HIV waxay daciifisaa habka difaaca -“ waxay albaabka u furtaa infekshinada kale” - saa daraadeed, haddii aad qabto HIV iyo TB aan firfircooneyn, waxaad aad ugu dhow dahay inaad yeelato TB firfircoon. Haddii labadaan infekshin aan la daaweyn, way wada shaqeyn karaan si ay u dhaliyaan jiro aad khatar u ah.

Waa maxay sababta ay muhiimka u tahay in layga baaro TB haddii aan qabo HIV?

Haddii aad qabto HIV waa muhiim inaad ogaatid inaad qabtid TB aan firfircooneyn, maadaama TB aan firfircooneyn ay aad iyo aad ugu eg tahay inay u gudubto TB firfircoon ee dadka qaba HIV. Haddii aad leedahay TB aan firfircooneyn iyo sidoo kale HIV , waxaad qaadan kartaa daaweyn.

Waa maxay sababta ay muhiimka u tahay in layga baadho HIV haddii aan qabo TB firfircoon?

Haddii aad qabto TB firfircoon waa muhiim inaad ogaato inaad qabto HIV maadaama dadka qaba TB firfircoon ay mar marka qaarkood yihiin dad sidoo kale qaba HIV. Waa muhiim in lagu baadho si haddii aad qabto HIV iyo TB firfircoon , aad u heli karto daaweyn.

Baaritaano nooc ah ayaa layga baahan yahay si aan isaga baaro TB?

Baaritaanada guud ee saddexda ah ee TB ayaa lagu sameyn karaa rugta caafimaadka xamadka ee kasta ee ku taal NSW. Waxay yihiin:

- Baaritaanka Maqaarka ee Qaaxada/feeraha (TST), oo sidoo kale loo yaqaan baadhitaanka Mantoux
- Raajada xabadka
- Baadhitaanka candhuufta (candhuuf tufid)

Baadhitaanadani waxay garan karaan haddii aad TB qaaday wakhti hore (TB aan firfircooneyn) ama haddii aad qabto TB firfircoon. Go'aanka ku saabsan baadhitaanada loo baahan yahay waxaa sameyn doona rugta caafimaadka xabadka.

Baadhitaanadee baan u baahan nahay si aan u sameeyo HIV?

Baadhitaanka dhiiga ee HIV ayaa lagu sameyn karaa rugta caafimaadka galmada ee kasta ee NSW ku yaal ama dhakhtarkaaga qoyska.

Waa maxay khatarshku?

Dhammaan baadhitaanada TB waa BILAASH rugaha caafimaadka ee ku yaala NSW. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato ballan si aad u tagto rugta caafimaadka xabadka laakiinse uma baahnid kaadhka Medicare.

Baadhitaanka HIV waa BILAASH xarumaha caafimaadka galmada ee NSW ku yaal umana baahnid Medicare Kaadh. Waxaa sidoo kale laga helayaa dakhtarkaaga xaafada laakiin waxaad u baahan tahay kaadhka Medicare.

QAYBTA 4: DAAWEYNTA TB IYO HIV

Daaweynta TB

TB firfircoon waa la daaweyn karaa kana bogsan karaan dadka qaba HIV. TB firfircoon waxaa lagu daaweeyaa iskudarka antibiyootig ugu yaraan 6 bilood. Kalkaaliye ayaa ku eegayaa qaadashada daawada TB si uu u jeegareeye inay kuu keento wax saameyn ah iyo inuu hubiyo in daaweynta la dhameysto.

TB aan firfircooneyn ee dadka sidoo kale qaba HIV waxaa lagu daaweeyaa mudo 6 bilood ah antibiyootig si looga hortago inay isu bedesho TB firfircoon.

Daaweynta HIV

Wakhtigan xaadirka ah HIV iyo AIDS wax daawo ah ma leh, si kastaba ha ahaatee daawooyin badan ayaa la sameeyey si ula dagaalamaan HIV iyo inay gaabiyaan waxyeelada feyraska ee habka difaaca jirka. Daaweynta, dad badan oo qabay HIV ayaa awooda inay caafimaad qabaan oo ay sii wataan inay u noolaadaan sidii qof caafimaad qaba, masquul ah oo leh nolol wax fulisa.

Waa maxay kharashku?

Dhammaan daaweynta TB waa BILAASH. Looma baahna kaadhka Medicare.

Daaweynta HIV waxaa heli karaa dhammaan dadka leh Medicare kaadh iyago bixinaya kharash yar.

QAYBTA 5: MACLUUMAAD KALE

Qabida HIV ama TB saameyn ma ku yeelanaysaa xaaladeyda sharci ee socdaalka?

TB:

Qabida TB aan firfircooneyn ama TB firfircoon cudurku MA saameyn doono u soo socdaalidaada Australiya.

HIV:

Haddii aad tahay degane joogta , oo qabitaanka HIV ama saameyn doonto xaaladaada socdoaal. Si kastaba ha ahaatee, dhammaan codsadayaasha deganaanshaha joogtada ah waxaa laga doonayaa inay ku gudbaan shuruudaha caafimaadka ee ay ka midka tahay baadhitaanka HIV iyo raajada xabadka. Shuruucda iyo sharciga ku saabsan noqoshada degane joogta ah waa kuwo dhib badan. Sidaa daraadeed waa muhiim inaad hesho tallo sharci ah wakiilka socdaalka oo aqoon leh.

Qarsoodi ahaanta

Qarsoodi ahaanta micnaheedu waxaa weeye in macluumaad kasta oo ay kaa heyso adeega caafimaadku waa arin gaar ah, mana siin karaan macluumaadkaas dad kale ogolaanshahaaga la'aantiis. Australiya gudaheeda sharciga ayey ka soo horjeedaa in shaqaalaha daryeelka ee caafimaadku kala hadlaan macluumaadkaaga gaarka kuwo kale.

Isticmaalida Turjumaanada

Waxaad heli kartaa turjumaan markaad la hadlayso shaqaalaha daryeelka caafimaadka ama adeegyada kale. Sida dhammaan shaqaalaha daryeelka caafimaadka, turjumaanada waa INAY ilaaliyaan arimahaaga qarsoodi ga ah.

Isticmaalka turjumaanka waxaad awoodaa:

- Inaan fahamto wax kasta oo lagu sheegay
- Inaad hubto wax kasta in wax kasta oo aad tiraahdo la fahmi doono
- Inaad su'aalo weydiiso jawaabana heshid
- Inaad awoodid fahmida iyo ka raali ahaanshaha baadhitaanada ama daaweynta

Turjumaanada taleefanka (TIS) ayaa laga helayaa meel kasta oo Australiya ka mid ah. Ku wac 131 450 (khrashka wecitaanka caadiga ah) waxaana lagugu xiriirinayaa adeega aad dooneysid inaad la hadashid iyo turjumaanka taleefanka.

ADEEGYADA KU CAAWIN KARA:

Rugaha Caafimaadka Xabadka

Gal wixii ah rugta caafimaadka xabadka ee kuugu dhow:

www.health.nsw.gov.au/publichealth/infectious/tb/pdf/chest_clinics/pdf

Rugaha Caafimaadka Galmada

Wixii ah rugta caafimaadka galmada ee kuugu dhow ka firi hoosteeda 'S' buugga taleefanada ee White Pages AMA ka wac Khadka taleefanada ee Caafimaadka Galmada 1800 451 624

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan HIV ee luuqadaada ah gal:

Adeega Dhaqamada badan ee Hepatitis C iyo HIV/AIDS www.multiculturalhivhepc.net.au

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan TB ee luuqadaada ah gal:

Adeega Isgaarsiinta Caafimaadka Dhaqamada badan www.mhcs.nsw.gov.au

Wasaaradda Caafimaadka ee NSW

www.health.nsw.gov.au/PublicHealth/Infectious/TB/index.asp